


Waa maxay go'aan gaarida la taageero?

Go'aan gaarida la taageero waxay kuu oggolaanaysaa in aad gaarto kala doorashooyin ku saabsan nolashaada iyada oo taageero laga helayo qoys, asxaab, ama xirfadle lagu kalsoon yahay.

- Waxaad u isticmaali kartaa go'aan gaarida la taageero si aad u aqoonsato cidda aad doonayso in ay ku taageerto iyo sida aad doonayso in lagu taageero.
- Qofka wax taageera ee aad doorato ayaa kaa caawin kara soo ururinta macluumaadka, qiimeynta waxyaabaha la kala dooranayo, ama kala xiriirida go'aankaaga ee dadka kale.
- Go'aan gaarida la taageero waa hab ay dadka oo dhan isticmaalaan mar uun.
- Go'aan gaarida la taageero waxay noqon kartaa qorshe muhiim ah oo la isku weydiyo haddii aad u baahan tahay taageero dheeraad ah si loo soo ururiyo macluumaad dheeraad ah, qiimeynta waxyaabaha la kala dooranayo, ama kala xiriirida go'aanadaada ee dadka kale.

Ogeysiinta ku saabsan wareejinta xuquuqda

Ugu yaraan hal sano ka hor inta ardaygu uusan noqon 18 jir, dugsi degmada ayaa ogeysiya ardayga iyo waalidka in xuquuqaha loo wareejin doono ardayga marka uu gaaro 18 jir. Go'aan gaarida la taageero waa kala doorasho muhiim ah oo laga fikiro ka hor inta aan loo jeesan kala doorashooyin badan oo xaddidan sida mas'uulnimada.



Halkee baan ka helaa macluumaad dheeraad ah?

- Waxyaalo badan oo dheeraad ah ka ogow: Website-ka Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon ee Go'aan Gaarida La taageero: <https://www.oregon.gov/dhs/Supported-Decision-Making/Pages/index.aspx>
- Website-ka Waaxda Waxbarashada ee Oregon: <https://www.oregon.gov/ode/students-and-family/SpecialEducation/SecondaryTransition/Pages/Secondary-Transition-for-Students-with-Disabilities.aspx>
- Website-ka Ilaha Waxbarashada Kala guurka ah ee Oregon <https://sites.google.com/mesd.k12.or.us/oregontransitioneducation/self-determination-communication>

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka kala xiriir 503-945-5811 ama email u dir dd.directoroffice@dhsosha.state.or.us. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

DHS 3991 (12/2021) SM

Go'aan Gaarida La taageero



Waxaad xaq u leedahay in aad wax kala doorato nolashaada! Marka aad noqoto 18 jir, waxaad xaq leedahay in aad gaarto kala doorashooyinka sida:

- Halka lagu noolaanayo
- Halka laga aadayo dugsi
- Halka laga shaqeynayo
- Cidda waqti lala qaadanayo
- Sida aad u kharash gareynayso lacagtaada
- Waxa ay tahay taageerada aad u baahan tahay ama rabto, iyo
- Cidda aad rabto in ay ku taageerto.

Sidoo kale waad:

- Codeyn kartaa doorashooyinka
- Ku dhaqmi kartaa diinta aad rabto
- Geli kartaa heshiisyo, oo
- Gaari gartaa go'aano ku saabsan daaweynta caafimaad.

Sii socoshada go'aan gaarida la taageero



- ☑ Waxaa jira noocyo badan oo ah go'aan gaarida la taageero. Kala doorashada taageeradani waxaa la isticmaali karaa iyada oo kaliya ama ku xiran noocyo kale oo taageero.
- ☑ Kala doorasho kuu oggolaanaysa in aad sii haysato wax badan oo ka mid ah xuquuqdaada ayaa had iyo jeer la raadiyaa oo la isticmaalaa ka hor kala doorashooyinka aadka u xaddidan.
- ☑ Xataa haddii aad isticmaasho kala doorashada taageerada aadka u xaddidan, sida mas'uulnimo ama wax ilaalinta, waa in lagugu taageeraaa gaarida go'aano kuu gaar ah.

Xaddidaada ugu yar leh

Xaddidaada ugu badan



Kala doorashada taageerada ee nooc kasta oo go'aan ah (marka qofku codsado)

- Go'aan gaarida la taageero
- Bixinta macluumaad
- Maamulka kiiska iyo adeegyada la xiriira

Taageerada loogu talagalay lacagta iyo iyo go'aanada hantida

- Koontooyinka ABLE
- Taageerada maamulka lacagta
- Koontooyinka wadajira



Taageerada loogu talagalay go'aanada caafimaadka iyo Fayo-qabka

- Wakiilada daryeelka caafimaad
- Magacaabista wakiilka ee ku dhawaaqida daaweynta caafimaadka dhimirka
- U doodayaasha daryeelka caafimaadka
- Mas'uulnimada (oo kaliya la isticmaalo marka ay xaddidaada yari suurtagalka ahayn)

Taageerada loogu talagalay lacagta iyo iyo go'aanada hantida

- Wakiilka la siinayo lacagta Social Security-ga
- Awoodda qareen
- Ammaanooyinka
- Wax ilaalinta